# FAAFINTA RASMIGA

# الجريدة الرسمية

*DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA*

لـولايــة أرض بــونـت الــصــومــال

Sannadka 2 [aad] Garoowe, 23 Janaayo 2000 **Lam. 1**

**FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA** جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee **Madaxtooyada** Dawlad Goboleedka Puntaland

---

Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar walba.**Rukunka** Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka gudihiisa,dibaddana waa Sh.So.500.000-**Rukunka** la waydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilowdaa 1da janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.


---

## TUSMADA

### Qaybta Koowaad

### Sharci


- **Sharci Lam.** 1 ee 23/01/2000, kuna saabsan nabadgelyada guud Bogga. 1
- **Sharci Lam.2** ee 23/01/2000, kuna saabsan Horumarinta Daaqa Bogga. 10
- **Sharci Lam.3** ee 23/01/2000, kuna saabsan dhulka Beeraha Bogga 15
- **Sharci Lam. 4** ee 23/01/2000, kuna saabsan Anshaxa Falimada Bogga. 21
- **Sharci Lam. 5** ee 23/01/2000, kuna saabsan Wakaalada W/ (PUNA. Bogga. 24


### Qaybta Labaad

### Xeer


- Xeer sharci Madaxweyne L.1 ee 5 Jannaayo 2000 kuna saabsan masuulnimada Wasaarada cadaaladda ee garsoorka Puntland Bogga. 28


### Qayta Saddexaad

Talooyin , Isgaarsiin, Ogaysiis IWM.

**Waxba ma leh**

**DAWLAD G.PUNTLAND EE SOOMAALIYA** | **PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka, Isgaarsiinta iyo Boostada**
**Ministry of information, culture, telecommunications & Post**

Ref.__________ Date. 23 Janaayo. 2000

**Qaanuun Lam. 4**

**Qaanuunka Anshaxa Filimada.**

Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Puntland

Markuu arkay qodobka 12.1 iyo qodobka 12.5
Axdiga Dawlad Gobolleedka Puntland.
Markuu arkay go'aanka Golaha xukuumadda 15/11/99
Markuu dhagaystay soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Isgaarsiinta.
Markuu arkay baahida loo qabo in la xakameeyo loogana hortagayo wax yeelada ka imanaysa filimada iyo in la ilaaliyo hab dhaqanka iyo Anshaxa, waxaa lagama maarmaan noqotay in filimada loo sameeyo xeer lagu ilaaliyo Anshaxa, wuxuu soo saaray qaanuunka soo socda:-

**Qodobka Iaad**

1.1 Waa in la abuuro Guddi heer qaran ah oo lagu magacaabo Guddiga faafreebka (Censorship board) shaqadooduna tahay hubinta hab dhaqanka filimada ka reebida, ka joojinta wixii meel kaga dhac ku ah Diinta, Dhaqanka, Siyaasada, Amniga, Caafimaadka iyo Anshaxa suuban ee Soomaalida Puntland iyo kormeerka Goobaha filimada.

1.2 Guddigu wuxuu ka koobnaandoonaa xubno ka kala socda:-

| | | |
|---|---|---|
| I. | Wasaaradda Warfaafinta H, Dh, iyo Isgaarsiinta | Guddoomiye |
| II. | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Amniga | Xubin |
| III. | Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta | " " " |
| IV. | Agaasinka Guud ee Tacliinta | " " " |
| V. | Ciidanka Booliska | " " " |

1.3 Guddigu wuxuu yeelan doonaa Guddiyo heer Gobolleed iyo heer Degmo, waxayna ka kala iman doonaan Wasaaraddaha iyo Hay'adda ku xusan qodobka 1aad (1.2)

1.4 Guddiyada waxaa lagu magacaabi doonaa xeer Wasiirka Warfaafinta H, Dhaqanka iyo Isgaarsiinta oo helay talada Hay'adaha xukuumada ay ka tirsan yihiin

(2)

## Qodobka 2aad

2.1 Dhammaan mulkiilayaasha goobaha filimada waa in ay si deg deg ah isaga diiwaan geliyaanWasaaradda Warfaafinta ayna ka qaataan formka ogolaanshaha.

2.2 Wasaaradda Warfaafinta ayaa awood u leh fasax bixinta samaynta shaneemo (Cinema), Masraxyo (Theatre) Filim qaadista, iyo ogoonta tayada, tirada noocyada iyo fiidiyowyaasha dalka la keenayo.

## Qodobka 3aad.

3.1 24 Saac ka hor inta aan la soo bandhigin filimka waa in la mariyo faafreeb.

## Qodobka 4aad

4.1 Waxaa reeban dhammaan filimada dhanka ka ah Diinta, Dhaqanka iyo Anshaxa, Sid:-

a) Afduubka.
b) Filimada dhiiri gelinaaya isticmaalka maandooriyayaasha.
c) Galmada iyo kufsiga.
d) Isdilka.
e) Dhaca tooska ah iyo jid gooyada.

## Qodobka 5aad.

5.1 Waxaa ka reeban caruurta ay dadoodu ka yar tahay 15 sanno in ay galaan filimada wax u dhimaya maskaxdooda, Akhlaaqdooda iyo dhaqanka guud ee ay kula dhaqmayaan Bulshadda.

## Qodobka 6aad.

6.1 Dumarka Uurka leh iyo caruurta dadoodu aad u yar tahay, waxaa ka reeban in ay daawadaan filimada argagaxa leh ee reebaya raadad naxdinta leh.

## Qodobka 7aad.

7.1 Fal-ciqaabeedka ka dhaca goobaha shaneemooyinka, Masraxyada, fal dambiyada filimada iyo fiidiyowyaasha, waxaa lagu qaadayaa qaynuunka ciqaabka iyo qaynuunada kale ay dambiyaashoodu la xiriiraan ee Dawlad Goboleedka Puntland.

## Qodobka 8aad.

8.1 Saacadaha soo jeedka filimada waa ilaa 10ka fiidnimo. (22 hours)

**Qodobka 9aad.**

9.1 Waxaa reeban filimada dhiiri gelinaya been abuurka (Forgery)
Waxaa la dhiir gelinayaa filimada Ciyaaraha, Cilmiga, Wararka, Dhaqaalaha, Diinta, Fanka, Maaweelada Nadiifka ah iyo dhacdooyinka muhiimka ah, Dalxiiska iyo taariikhda iwm

**Qodobka 10aad.**

10.1 Siloo sugo caafimaadka Goobaha Filimada waa in loo habeeyaa Goobta filimka lagu dhigayo qaab masraxeed ( Theatre).

**Qodobka 11aad**

11.1 Waa in ay meheradaha filimadu iska bixiyaan khidmada faafreebka ee Wasaaradda Warfaafinta oo ah sida hoos ku cad.

a) Filinka kasta oo la dhigayo khidmada waxay u qaadanaysaa Wasaaradda So.Sh. 10,000

**Qodobka 12aad**

12.1 Dhawaaqa samaacadaha cod baahiyaha waa in ay ku ekaadaan goobta filimka lagu dhigayo.

**Qodobka 13aad.**

**Soosaarista Xeer Wasaaraddeed Oo Ku Saabsan Nidaaminta Filimada.**

13.1 Wasaaraddu waxay soo saari kartaa xeer Wasaaraddeed oo ay ku nidaaminayso Filim soo saarista iyo khidmadaha la xiriira.

**Qodobka 14aad.**

14.1 Waxa la buriyey qaynuun kasta oo ka horimaanaya ama aan la socon Karin qaynuunkan.

**Qadobka 15aad.**

15.1 Qaynuunkan wuxuu dhaqan gelayaa markii Golaha Wakiilladu Ansixiyaan oo uu saxiixo Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Puntland, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Puntland

Cabdulaahi Yuusuf Axmed